

Aqoonsiga waxbarashada Debedda lagala yimi

Marka waxbarashada debedda lagala yimi laga aqoonsanayo Norway waxa looga jeedaa waxa la barbar dhigayaa waxbarashada u dhiganta ee Norway. Aqoonsigu waxa uu qaadani karaa wakhti dheer, sidaa darteed haddii aad Oslo ku cusub tahay waa in aad aqoonsiga codsataa wakhtiga ugu horreeya ee suuragal ah.

Aqoonsiga u dhigma heerka dugsiga sare

Haddii aad debedda kala timi waxbarasho dugsiga sare oo iyada dhiggeeda laga helo dugsiga sare ee Norway, waxa waxbarashada kuu qiimayn kara waaxda waxbarashada dadka waaweyn ee degmada Oslo iyo waaxda barridda xirfadaha ee degmada Oslo. Tusaale Ahaan waxbarashada dugsiga sare waxay noqon kartaa : nijaar, wastaad, kalkaaliso caafimaad oo heer hoose ah, timo jare, makaanik, data, cunto kariye, koronto-yaqaan ama biyo-geliye. Waaxda waxbarashada dadka waaweyni waxa kale oo ay leedahay habab u gaar ah oo ay ku aqoonsato dadka leh waaya-aragnimada shaqo ee dheer laakiin aan haysan warqado caddaynaya aqoontooda. Hababkan waxa loo yaqaan "Tijaabada shaqo" (yrkesprøving) iyo "qiimaynta aqoonta dhabta ah ee qofka"(real kompetanse vurdering).

Aqoonsiga waxbarashada heerka sare

Waxa jira hay'ado kala duwan oo qiimeeya isla markaana aqoonsada waxbarashada heerka sare ee debedda lagala yimi. Shahaadada oo si guud loo aqoonsadaa waxay wax ka sheegaysaa muddada iyo heerka waxbarashada, waxana arrintan samaysa hay'adda "NOKUT". Aqoonsiga tayada shahaadadu waxa uu sidoo kale wax ka sheegayaa nuxurka ay waxbarashadu ka kooban tahay oo la barbar dhigayo dhiggeeda norwejiga ah. Aqoonsiga noocan oo kale ah waxa sameeya hay'adaha waxbarasho ee bixiya waxbarashada u dhiganta tan aad aqoonsiga la doonayso.

Shaqooyinka qaar ayaa u baahan in uu qofku helo ogolaansho inta aanu ku shaqaysan . Tusaale ahaan dhakhtarka, dhakhtarka ilkaha, ilko-daryeelaha, dhakhtarka cilmi-nafsiya, kalkaaliyaha caafimaadka, kalkaaliyaha caafimaadka heerka hoose (hjelpetleier), umuliso, jirduuge, macalimka, macalinka xannaanada carruurta, qareenka, baadhayaasha xisaabaadka (odhad) iyo kabtanka badda. Waxa jira xafiisyo kala duwan oo ka masuul ah ogolaansho bixinta. Cinwaanada iyo warbixino dheeraad ah waxad ka heli kartaa boggan qaybaha norwejiga iyo ingiriisiga ah.

Si aad u bilowdo jaamicadda ama machadka sare ee Norway, waa in aad buuxisaa shuruudaha aqbalaadda. Xafiiska isuduwidda gelitaanka ayaa kuu sheegi kara in aad buuxisay shuruudihii iyo in aad u baahan tahay maadooyin kale oo aad ka qaadato dugsiyada sare ee Norway.

Waxa kuu faa'iido badan in aad haysato shahaado la aqbalay marka aad shaqo codsanayso. Waxa kale oo fiican in aad codsato in shahaadada lagu qiimeeyo xataa haddii aad wadato waxbarasho aanad dhamaystirin. Markaa waxa lagu aqoonsan karaa qaybo ka mid ah waxbarashadaada.

Haddii shahaadooyinkaaga waxbarasho ay ku qoran yihiin luqo aan ahayn ingiriisi, waa in aad ku samaysaa turjumid rasmi ah oo la aqoonsan yahay oo uu shaambadeeyey saxeexayna xafiiska ama qofka turjumay. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan cinwaanada xafiisyada aqoonsiga iyo turjumaanada waxad ka heli kartaa qaybta norwejiga iyo ingiriisiga ee boggan "www.velkommenoslo.no".

